



OREGON
DEPARTMENT OF
EDUCATION



Oregon Department of
Early Learning
and Care

TAAGEERADA ARDAYDA HORE EE LA KULMAYA DEGGANAANSO LA'AAN GURI

Dukumintigani wuxuu siinayaa kheyraad carruurta da'dooud u dhaxasyo 0-5 iyo qoysaskooda la kulmaya degganaansho la'aan guri.



Ma Ogayd?

Carruurta da'dooud u dhaxasyo 0 ilaa 5 ayaa mudnaanta la siiyaa badi adeegyada waxbarashada hore oo barnaamijyadani waa u bilaash qoysaska uqalma adeegyada for McKinney-Vento.

Waaxda Waxbarashada Hore iyo Daryeelka

Waaxda Waxbarashada Hore iyo Daryeelka waa wakaalad cusub oo gobolka Oregon ah oo taageerta horumarka iyo fayo-qabka dhammaan carruurta Oregon waxayna hubisaa in qoysaska gees kasta oo gobolka ka mid ah ay helaan waxbarasho hore oo tayo sare leh iyo daryeel.

- Websaydka Waaxda Oregon ee Waxbarashada Hore oregon.gov/delc
- Barnaamijyo iyo Adeegyo bilaash ah oo ay bixiso DELC oregon.gov/delc/programs
- Xarumo Waxbarashada Hore oregon.gov/delc/programs/Pages/hubs.aspx
- Gargaarka Daryeelka Ilmaha iyo Taageerada Qoyska oregon.gov/delc/families/Pages/child-care-assistance-family-support.aspx#HelpPayingForChildCare
- Kheyraadka iyo Ugudbinta Daryeelka Ilmaha oregonccrr.org

Kheyraad Dheeraad ah

- 211 Hel Daryeelka Ilmaha Oregon findchildcareoregon.org
- Carruurta iyo Qoysaska Dareemaya Hoy la'aan eclkc.ohs.acf.hhs.gov/family-support-well-being/article/children-families-experiencing-homelessness
- Taageeridda Carruurta iyo Qoysaska Dareemaya Hoy La'aan ee Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore eclkc.ohs.acf.hhs.gov/family-support-well-being/article/children-families-experiencing-homelessness
- Iskaashiga Waxqabadka Bulshada Oregon (CAPO): Shabakadda La-dagaalanka Saboolnimada ee Oregon caporegon.org



Waxda Waxbarashada ee Oregon

Waxda Waxbarashada Oregon waxay kormeertaa waxbarashada in ka badan 560,000 oo arday oo ku jira nidaamka waxbarashada dadwaynaha ee K-12. ODE waxa ay koobeysaa waxbarashada hore, barnaamijyada dugsiga kahor ee dadweynaha, Dugsiga Dhagoolayaasha ee dawladda, barnaamijyada gobolka ee carruurta naafada ah, iyo barnaamijyada waxbarashada ee xarumaha sixitaanka dhallinyarada Oregon.

- Yaan kala xiriiraa dugsigayga ama degmadayda wixii ku saabsan kheyraadka guryeynta degganaansho la'aanta?
 - La xiriir xiriiriyahaaga oregon.gov/ode/schools-and-districts/grants/ESEA/McKinney-Vento/Pages/McKinney-Vento-Students-&-Families.aspx
 - Liiska Xiriirka ee Xiriiriyaha McKinney-Vento
 - [Degmo Yar Ahaan](#)
 - [Degmo Wayn Ahaan](#)
- U Wareegga Xadaannada oregon.gov/ode/students-and-family/transitioning-to-kindergarten

» Qoysaska qaar waxay u baahan yihiin daryeel ilmo oo bilaash ah halka waalidiinta ay raadinayaan guryayn iyo shaqo xasilloon. Ma jiraa khayraad la heli karo?

Haa, tallaabada koowaad waa inaad la xiriirto Khayraadka iyo Daryeelka Ilmaha iyo Gudbinta si aad uga caawiso qoysaska inay helaan barnaamij ku habboon baahidooda gaarka ah.

» Waxaan hadda ogaaday in arday fasalka 2aad ah oo helaya kheyraadka McKinney-Vento uu leeyahay walaal 3 jir ah iyo 4 jir ah. Miyaan ugudbiyaa qoyska barnaamijyada waxbarashada hore sida Head Start?

Haa, qoysaska uqalma adeegyada McKinney-Vento ayaa mudnaanta la siiyaa inta badan barnaamijyada waxbarashada hore. Ka caawinta qoysaska inay maraan nidaamka waxbarashada hore waa door muhiim u ah isku xidhayaasha.

» Goorma ayay tahay in qoysasku ka diiwaangeliyaan carruurtooda shan sano jirka ah xadaanada?

Qoysasku waa inay iska diiwaangeliyaan xadaanada xilliga gu'ga iyo ugu dambayn bartamaha May. Diiwaangelinta hore waxay xaqiijisaa in qoysaska lagu martiqaadi doono munaasibadaha dugsiga inta lagu jiro xagaaga. Haddii aadan hubin dugsiga qoyska, la xiriir xiriiriyaha.

Waxda Adeegyada Aadanaha

Waxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon waa hay'adda maamulka gobolka oo caawisa dadka reer Oregon si ay u gaadhaan fayooobi iyo madaxbannaani. Waxaan siinaa adeeyo toos ah in ka badan 1 milyan oo reer Oregon ah oo ku nool Oregon sannad kasta. Adeegyadani waa shabakad badbaado oo fure u ah dadka ku nool bulshooyinka kala duwan ee Oregon.

- Hagidda Waxbarashada oregon.gov/odhs/data/cwdata/cw-apsr-2022-att-14-education-guidance.pdf
- Barnaamijka Dhallinta La Kulmaya Hoy La'aan Ka-shaqaynta Joojinta Hoy La'aanta Dhallinta : Dhallinta La Kulmaya Hoy La'aan: Gobolka Oregon oregon.gov/odhs/providers-partners/homeless-youth

» Ka Waran Kheyraadka Xilliga Xagaaga?

Degmooyin badan oo Oregon ah ayaa bixiya u wareegidda barnaamijyada xadaanada inta lagu jiro xagaaga. Marka aad ka caawinayso qoysaska in ay ku xidhmaan dugsigooda, hubi in dugsigu uu qabto barnaamijka kala wareegga xagaaga ee xadaanoyinka soo socda iyo qoysaskooda.

» Sideen ku ogaan karaa haddii qoysasku ay uqalmi karaan Barnaamijyada Waxbarashada Hore ee for McKinney-Vento?

Qoysaska u qalma McKinney-Vento ayaa mudnaanta la siiyaa inta badan barnaamijyada waxbarashada hore ee si guud loo maalgeliyo.

TALLAABOYINKA XIGA

- ☐ Ma la xiriirtay Xiriiriyahaaga Hoy La'aanta McKinney-Vento?
oregon.gov/ode/schools-and-districts/grants/esea/mckinney-vento/pages/default.aspx
- ☐ Ma la xiriirtay Xarumahaaga Waxbarashada Hore?
oregon.gov/delc/programs/Pages/hubs.aspx



OREGON
DEPARTMENT OF
EDUCATION



Oregon Department of
Early Learning
and Care